



ismaamulka san diego



# Kala Saarida Dareeraha

Maamulka ugu fiican ee Nidaamka Dhismaha Biyaha Daadka (BMPs) ayaa lagu rakibaa dhismeyaasha qaar oo ku yaala Ismaamulka si ay gacan uga gaystaan **kahortaga maadooyinka wasaqda ah** sida qashinka, daawooyinka bacriminta beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruuraxa soo gala marinnada biyaha daadka roobka kadibna galaaya baliyadda, wabiyada, iyo badwaynta deegaankeena. Gurigaaga waa mid kamid ah boqolaalka ku yaala Ismaamulkeena oo leh ugu yaraan hal BMP.

## ***BMP-yadu Waxay Nadiifiyaan Marinnada Biyaheena***

BMP-yadaada waxaa loo sameeyay inay maadooyinka wasaqda ah ka saaraan biyaha roobka ee kasoo dareera dhismahaaga ilaa heerka u sareeya ee suuragalka ah. Maadaama aad tahay mulkiilaha mid kamid ah dhismeyaashaan, xeerarka ismaamulka ayaa kaa doonaaya inaad **sameeyso kormeer joogto ah iyo talaabooyinka dayactirka** si loo hubiyo in BMP-yadaada si sax ah u shaqaynayaan.

**Diiwaanadeena ayaa muujinaaya inaad haysato ugu yaraan BMP-ka kala saaraha socda ee dhismahaaga.** Si ay kaaga caawiso joogtaynta BMP-gaan **Barnaamijka laaalinta Waraha Biyaha ee ismaamulka San Diego** ayaa ku siinaaya buugaan xogta si looga jawaabo su'aalaha aad ka qabi karto BMP-yada iyo sida aad u joogtaynayso.

## ***Sida BMP-gaaga Kala saareyaasha Socda u Shaqeeyo***

BMP-yada Kala saaraha socda ayaa difaaca marinnada biyaha ee deegaankeena ayagoo qabta wasaqda kahor intaysan gelin nidaamka daadka biyaha. Marka biyaha daadku maraan kanaalka kala saaraha vortex, waxyaabaha sunta ah ayaa lagu leexiyaa qoladaha qabanaaya, halka daadka nadiifta ah lagu siidaayo nidaamka biyaha daadka.

waad ku mahadsan  
tahay samaynta  
qaybtaada si

loo ilaaliyo  
marinnadeena biyaha





ismaamulka san diego



waad ku mahadsan  
tahay samaynta  
qaybtaada si

loo ilaaliyo  
marinadeena biyaha



20DISEEMBAR2016

## Kala Saarida Dareeraha

### *Hel oo Hayso BMP-gaaga*



Si aad u hesho BMP-gaaga kala saarida dareeraha, raadi dabool dhulka ka koreeya kaasoo muujinaaya cida samaysay iyo nooca kala saaraha.

Marka aad hesho BMP-gaaga kala saaraha socda, waa muhiim inaad joogtayso. Ku haynta BMP-ga kala saaraha socda xaalad shaqaynaysa ayaa kaa caawinaysa inaan ilaalino nadaafada marinada biyaha ee deegaankeena. Hoos waxaad ka helaysaa dhawr shaqooyinka dayactirka ah si aad u samayso:

- **La xariir adeeg bixiye tababaran si uu u sameeyo kormeero iyo dayactir. Shirkada samaysay BMP-gaaga ayaa badanaa kaa caawin karta helitaanka adeeg bixiyaal tababaran.**
- **Calaamadaha dayactirka loo baahan yahay waxaa kamid ah in meesha qaruurax isku guray, qashin, xash, wasaqda saliida, ama olyada.**
- **Qaybaha halaabay ee kala saaraha socda ayaa u baahan doona in la dayactiro ama la badelo.**

Si aad u hesho liiska shaqooyinka kale, ka fiiri foomka xaqiijinta dayactirka ama qorsheyaasha dayactirka ee ka yimaada ee shirkada dhistay gurigaaga.

Sanad kasta Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ayaa kuusoo diraaaya foomka xaqiijinta dayactirka si aad u buuxiso, u saxiixdo, aadna ugu celiso Ismaamulka. Foomkaan waxaa loo adeegsadaa in la xaqiijiyo in dayactirka muhiimka ah lagu sameeyay BMP-gaaga.

Ku fashilmida samaynta dayactirka BMP-yadaada ayaa dhalin karta fulinta baaritaan ama kormeerka dabagalka ah.



***Haddii aad qabto su'aalo, Nagalaso Xariir:***

**Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha**

**1-858-495-5323**

BMP.Program@sdcounty.ca.gov

www.sandiegocounty.gov/stormwater